13 Yaa kale aan ka raadsan karaa gargaar?

Gargaar haddii aad u bahato, waxaa la xariirtaa Hay'adda Qaramadda Midoobay ee Qaabilsan Qoxootida (UNHCR) iyo uruo kale, oo ku shaqo leh magangalyada qoxootida, sida:

UNHCR (XAFIISKA HAY'ADDA QARAMADDA MIDOOBAY EE QAABILSAN QOXOOTIDA)
tel: (00385) (01)37-13-555
web address: www.unhcr.hr
email: HRVZA@unhcr.org

HRVATSKI PRAVNI CENTAR (LAANTA SHARCIGA EE KURUWATIYA)
Hebrangova 21, Zagreb
tel: (00385) (01) 48-73-965
web address: www.hpc.hr; www.azil.com.hr
email: hpc@hpc.hr

HRVATSKI CRVENI KRIŽ (LAAN QEERTA CAS EE KURUWATIYA)
Ulica Crvenog križa 14/1, Zagreb
tel: (00385) (01) 46-55-814
web address: www.hck.hr
email: azilhck@hck.hr

ISUSOVAČKA SLUŽBA ZA IZBJEGLICE (ADEEGGA JESUIT QAXOOTIGA)
Jordanovac 110, Zagreb
tel: (00385) (01) 235-40-29
web address: www.jrs.hr
email: jrs@jrs.hr

CENTAR ZA MIROVNE STUDIJE (XARUNTA DARAASADDA NABAD)
Selska cesta 112a, Zagreb
tel: (00385) (01) 48-20-094
web address: www.cms.hr
email: cms@cms.hr

PRAVNA KLINIKA PRAVNOG FAKULTETA U ZAGREBU (XARUNTA SHARCIGA DAAWOOYINKA KULYADDA SHARCIGA GUDAHA ZAGREB)
Ulica Jurja Žerjavića 6/II, Zagreb
tel: (00385) (01) 4811-320
web address: www.klinika.pravo.unizg.hr
email: klinika@pravo.hr

Si aad ula xariirtid hay'addaha kale, ka raadso masuulka in uu kaa caawiyo.

Tix raacahan wuxuu qeyb ka yahay "dhanka qaanuuka in uu ka caawiyo magangalyo doonka " mashruucan waxaa maal geliyay Xafiiska Hay'adda Qaramadda Midoobay ee Qaabilsan Qoxootida (UNHCR).

7 Qareen sharciyeed Xaq ma u leeyahay? Haa!

Masuulka u qabisan howshaada kan kula hadlaaya markii uu aqbalay in aad gudbiso codsiga magangalyada caalmiga. isaga waxaa ku waajib ah in uu bixiyo macluumaadka ku saabsan nidaamka magangalyada caalamiga ah. Waxaa kale adiga lagu siin doonaa warbixin dheeraad ah markii codsigaaada badbaadda caalamiga ah la helo.

Haddii codsigaaga la diido, oo aadan haysan wax lacag ah, waxaad xaq u leedahay gargaar sharciyeed oo bilaash ah ee qoritaanka rafcaanka ka hor maxkamadda maamulka sare,

Waxaad heli doontaa liiska qareennada kuwaas oo bixiya gargaarka sharciga go'aanka ku saabsan codsigaaga ilaalinta caalamiga ah.

Waxa kale oo jira Hay'addo aad ka heli kartid macluumaad sharciyada ah ama talo inta lagu jiro nidaamka howsha oo dhan. Waxaad la xiriiri kartaa Rugta Qawaaniinta Kuruwatiya, Law Croatian (Hrvatski centar pravni). Waxaad ka heli kartaa lambarka telefoonka ee ay qeybta hoose ee tixracahan yar).

8 Maleeyahay xuquuq iyo waajibaad kale inta aan sugaayo go'aanka ku saabsan codsigeyga magangelyadda caalami ah? Haa!

Haddii aad si daran u xanuunsan tahay, waxaa xaq u leedahay gar gaar caafimaad. Caruurta iyo kuwa da'dda yar waxey xaq u leeyihiin dugsigga hoose iyo dugsigga dhexe. Waxaad xaq u leedahay in aad sameysatid wajibaadka diintaada, adigga oo aan qash qashaadin ammaanka daddka kale.

Waa in aad u hoggaansantaa qawaaniinta Kuruwatiya iyo xeerarka iyo sharciyada guriga ee xarunta soo dhaweynta ah, oo waa in aad iskaashi la samey saa saraakiisha.

Waa in aad wargelisaa masuuliyiinta isbedalka ku saabsan cinwaanka aad bedelayo laba maalmood gudahood

Masuulka weydii in uu ku siiyo warbixin dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaan.

9 Halkee ayaan ka joogi doonaa halka aan codsiga la sugayo xallinta? In Xarunta Qaabilaadda ee magangelyo doonka ah!

Xagee joogi doonaa inta aan codsigeyga magangalyada wili natijadiisa sugaayo? Kaamka qoxootida gudahiisa.

Waxaa lagu sii doonaa meel aad degtid gudaha Kaamka qoxootida, waxaad kale aad leedahay raashiin maalintii sadex mar, iyo wax yaabaha leyku nadiifiyo. Haddii ay muhiim tahay waxaa aad heli kartaa kabbo iyo dhar aad gashatid.

Markii aad joogtid Kaamka qoxootida, waxaa laguula dejin doonaa qof aad isku jinsi tihiin oo aadan aqoonin, waa in aad ixtiraamtid qomiyadaha kala duwan iyo caaddada ay leeyihiin daddaka kale, raac nidaamka shaqaalaha Kaamka qoxootida. Haddii aad isla timaadeen qoyskaada iyo adigga isku meel ayaa leydiin dejin doonaa.

Waa waajib arintaan in aad masuulka u sheeted, Haddii aad rabtid in aad Kaamka ka baxdid,

Haddii lacag kuu gaar ah aad wadato, waa in aad iska bixisaa qarashka hoyga ee xarunta soo dhaweynta. Haddii lacag kuu gaar ah aad qabto, waxaa kale oo aad raadsan kartaa hoy ka baxsan xarunta soo dhaweynta, laakiin marka hore waa in aad hesho ogolaansho ah oo rasmi ah. Hubi in aad laguu wici karo iyo E- mail ma heli kartaa ka soo baxay wasaaradda arrimaha gudaha cinwaanka gaarka ah (ku qor magaca iyo magaca qoyska ee jaraska albaabka iyo boostada), haddii kale saraakiisha qaabilsan ma awoodi doonaan in ay kuu soo

Sida magangalyo doonka caalamiga ah, waxaad ku leedahay sharci oggolaansho joogitaan gudaha Kuruwatiya oo aad si xor ah u socon kartaa dhurka Kuruwatiya oo dhan. Ka hor inta aadan kabixin, xarunta soo dhaweynta, waa in aad u sheegto shaqaalaha awoodda u leh, iyo inta lagu jiro saacadaha ay dajisay qawaaniinta xarunta soo dhaweynta ee waa in aad ku sugnataa xarunta soo dhaweynta, haddii aay shaqaalaha xarunta soo dhaweynta ay oggolaanin fasax. Ha ka tegin Kuruwatiya inta ay howshaad bixinta magangalyadda caalamiga ay socoto maxaa yeelay, waxaad waajih kataa ciqaab, taas oo ka mid noqon kara xannibaad ah xorriyadda iyo dhaqdhaqaaqa.

diri martiqaad rasmi ah. Xaaladda noocaas ah, masuuliyiinta waxey u qaadayaan oo laga yaabo in aad ka tagay Kuruwatiya iyo joojiyo nidaamka laguugu siiyo badbaado caalami ah.

10 Maxey tahay ulajeedadda leydajiyay Kaamka oodan ee Ajaanimbta ladejiyo ee ku yaal gudaha Ježevo (xarunta dadka lagu haayo, detention center)? Waa la xanibay socodkaada!

Sababo badan ayaa jiro oo laguu dejiyay Kaamka xiran ee Ajaanibta ee ku yaal gudaha Yejevo (Ježevo)

Magangalyo doonka ee caalamiga ah waxaa la geeyaa xarunta soo dhaweynta ajaanibta ee Ježevo inta badan sababtoo ah waxey weydisteen badbaado ka dib markii ay hore loo soo xareeyo inta lagu jiro nidaamka masaafuriska Kuruwatiya ka dhacaayo.

Maxaa yeelay, waxaad isku dayay inuu ka tago Kururwatiya si sharci darro ah ka hor showsha bixinta badbaadda caalamiga ah inta aan la dhameytirin, ama sababtoo ah waa lagama maarmaan si uu u adkeeyo xaqiiqooyinka iyo duruufaha ku saleysan codsigaaga, oo ay jirto halista ah ee aad Baxsadka; waxa kale oo laga yaabaa in loo baahdo si loo ilaaliyo amniga qaranka iyo nadaamka dadweynaha Kururwatiya, haddii aad aqoonsi ama jinsiyad aan la aasaasin, ama haddii uu jiro tuhun ah in soo gudbinta arjiga ka dhigan tahay ku xadgudub nidaamka qaadashada badbaado caalami ah.

Waxaad codsan kartaa sharaxaad faahfaahsan oo ka mid ah sababaha laguu dejiyay xarunta kor ku xusan masuuliyiinta oo soo bixiyay go'aanka ku saabsan hoyga.

Waxaad xaq u leedahay in aad hesho go'aanka rasmiga ah ee ku saabsan guriga Yajevo (Ježevo) iyo in aad racfaan ka dhan ah go'aankan ka qaadato Maxkamadda maamulka.

11 Maxaa dhacaya haddii aan helo go'aan diidmo ah oo ku saabsan badbaadda caalamiga ah? Waad ka dacwoon kartaa!

Go'aan noocan oo kale ah wuxuu ku dhammaadaa tilmaamo ku saabsan waqtiga gudahood oo aad soo gudbin kartaa ka cabasho maxkamadda maamulka.

Haddii aadan u gudbinin cabasho ka dhan ah go'aanka diidmada ah oo ku saabsan ilaalinta caalamiga ah, ama haddii sheegashadaada la saaray diidmo, in aad ka tagtaa Kuruwatiya. Haddii aadan ka tegin Kuruwatiya, waxaad ku qabanayo ciqaab sharci darro ku jogtid iyo kooxda kaalinta ee Xarunta Qaabilaadda ee Ajaanibta ee Yajevo (Ježevo), kadibna waa lagaa masaafurin doonaa Kuruwatiya.

Ka taxaddar, waqtiyada buuxinta codsiga in mararka qaar wuu gaaban yahay; jawaab celin degdeg ah ku doon gargaarka sharciyeed.

12 Ka waran haddii ley ogolaado magangalyo?

Waxaa lagu siin doonaa ogolaansho aad ku joogtid gudaha Kuruwatiya, waxaad lahaan doontaa xuquuq iyo wajibaad badan.

Waxaa lagu siin donaa warbixin dheeraad ah, oo ku saabsan xaqqa aad leedahay iyo waajibaadka, sidoo kale buug yar oo sharaxa wax yaabaha aad u baahan tahay in aad ogaato, oo uu ku siin doono Sarkaalka qaabilsan isdhexgelka.

WARBIXIN KU SAABSAN BADBAADDA CAALAMIGA AH JAMHUURIYADDA KURUWATIYA

SOMALSKI

Dowladaha Midowga Yurub (MY)

1 Austriya
2 Belgem
3 Bulgariya
4 **Kuruwatiya**
5 Qubrus
6 Shek Republik
7 Denmark
8 Estoniya
9 Fiiland
10 Fransiiska
11 Jermalka
12 Griiga
13 Hangariya
14 Eriland
15 Italiya
16 Latfiya
17 Lutwaniya
18 Luksumburg
19 Malta
20 Holland
21 Boland
22 Burtiqiiska
23 Roomaniya
24 Sloveshka
25 Sloveniya
26 Spain
27 Sweden
28 Ingriiska



UNHCR The UN Refugee Agency

1 Maxey tahay nooca badbaado ee aan ka heli karo gudaha Waddanka Kuruwatiya? Magangalyo ama ilaalo farciyeed?

Waxaad is araktay adigga oo dhex jooga gudaha Waddanka Kuruwatiya. Waxaad u maleysa in aad u baahan tahay badbaado, maxaa yeelay si xun ayaa lagu cadaabay markii aad joogtay Waddankaada ama waxaad ka cabsatey in si xun laguu cadaabo ka tirsanaanta oo aad ka tirsan tahay isir gaar ah, diintaada, qowmiyadaada ama urur gooni ah oo la cadaabay ama waxaad aaminsan tahay ra'yi siyaasadeed sidaas darteeda laguu cadaabay, ama ka cabsaneysid in lagugu cadaabi doono. Haddii sidaas ay jirto, waxaa laga yabaa in Kuruwatiy ku siiso magangalyo. Kuruwatiya waxey kalo ku siin kartaa ilaalo farciyeed laakin haddii aadan buuxinin sharuudaha magangalyo doonka. Haddii sidaas jirto, dalabkada dib ayaa loo fiirin doonaa. Ilaalo farciyeedka waxa la bixiyaa haddii aadan ku noqon karin waddankaada sababta oo ah halis jirta oo xukun dhimasho lagugu soo ganaxay ama qasaasid, cadaabis, si bini'aadanimada ka baxasan ama si xun laguu ciqaabo, ama ay jirto halis naftaada khatar ku ah shacabka sababta oo ah dagaalo dhex maro labo beelood oo hubeysan.

Xaalad dhaqaalo oo xun ama shaqqo la'aan ka jirta gudaha dalkaada darteeda leyskuma siiyo magangalyo.

2 Maxey tahay tilaabada ugu horeysa in aan sameeyo? Sharax ulajeeddada u dooneysid badbaado ama magangalyo!

Codso waqtiga ugu dhaqsaha badan ee macquulka ah, badbaado ama magangalyo, isla markii aad soo gashid gudaha Waddanka Kuruwatiya markii aad ka soo gashid (xuduuda, ama markii aad joogtid sandhiga booliska ama sarkaal booliska ugu horeeyo oo aad aragtid ka codso magangalyo ama xarunta lageeyo dadka ajaanibta). Xaalada gaah ah, waxad muujin kartaa ulajeedadaad ah in aad codsato magangalyo marka xiradda qoxootiga dhexdeeda marka aad ku sugan tahay.

Waa codsan kartaa badbaado ama magangalyo, haddii lagugu qabto adigga oo si sharci la'aan ku gudbaayo dalka xuduudiisa ama si sharci la'aan ku jooga gudaha Kuruwatiya. Inta lagu gudo jiro baritaanka uu ku baraayo booliska, waxaa xaq u leedahay in laguu keeno turjumaan.

Ku sheeg hadaka ugu sahlan in aad u baahan tahay magangalyo, ama in aad ka cabsaneysid in aad ku noqoto dalkaada hooyo, ama in ay naftada halis ku jirto ama in lagu soo cadaabay markii aad joogtay dalkaada hooyo. Waa qori kartaa hadalkan, sixiix kadibna u dhiib sarkaalka booliska. Waxaad saas ku sameen kartaa luuqad kasto oo aad adigga rabtid (kuu sahlan).

Haddii aad ku soo gashay gudaha Waddanka Kuruwatiya dukumiinti bugg ah ama dukumiinti qof kale iska leeyahay, si hagar la'aan ugu sheek isla markaana u sharax sababta. Haddii aad wadatid dukumiinti adigga leedahay, tusi iyaga.

Haddii uu booliska kuu wado maxkamada, laakin ka dooneysid Waddanka Kuruwatiya magangalyo, ugu cel celi in aad dooneysid ama rabtid magangalyo kana codso sidan in laguu diiwaan galiyo kiisa maxkamada.

Marka aad sheegatid in aad u baahan tahay magangalyo, waxaa lagaa qadaa faraha, da'daada oo ka wweyn 14 sano, sawir ayaa lagaa qaadi donaa, waxaa laguu sameyn donaa mudo kooban oo aad ku soo diwaan gelisit xarunta lagu haaye magangalyo doonaha.

Haddii aad codsatay magangalyo, markii aad joogtay xirada dadka ajaanibta ee ku taal gudaha Yejevo (Ježevo) la xariir masuulka. Waxaa ka sii fiican in aad warqad codsasho ah, in aad dooneyso magangalyo, ku qor luuqada aad ku dhashatay ama luuqada aad taqaanid sida (Ingriiiska, ama luuqado kale)

Haddii aad ka yar tahay 18 sano jir oo soo gashay kiligaa Kuruwatiya, islamarkiiba u sheeg qofka shaqaale ka ah xarunta dadka sogaly lageyo, si qof wakiil ah in laguu soo magacaabo. Wakiilkada wuxuu ilaalin doona xuquuqda aad leedahay inta lagu guda jiro howshaada. Haddii aad isku soo bandhigtid sida ilmo yar, oo ay masuuliyiinta rasmiga ah u qiimeyeen, in laga yaabo inaad da'da qaan gaar tahay, khubarada caafimaad ayaa lala xariirayaa si loo ogaad da'daada.

3 Sidee howsha ku bilabantaa? Markii la diiwaan galiyo codsiga magangalyada caalamiga ah!

Markii lagu geeyo Kaamka, waxaa lagugu wici doona wareysi oo ay kula joogi doona shaqaalha Kaamka, waxaa kale kula joogi doona turjumaan. Waqtiga lagu gudo jiro wareysiga, codsigaada badbaadda caalamiga ah waa la diiwaan gelin doonaa. Waa codsan kartaa turjumaanka ama masuulka kuula joogo marka wareysiga uu dhacaayo qofka ama jinsiga aad adiga rabtid. Haddii ay awodaan shaqaalah Kaamka wey kuu ogalan doonaan in ay kuu keenaan qofka aad adiga rabtid, shaqaalaha ka shaqeeya Kaamka wuxuu ku weydiina in aad sheegtid maclumaadkada qaaska ah, in aad faahfaahisid meelaha aad soo martay markaad imaneysay gudaha Waddanka Kuruwatiya, sidoo kale waa in aad sheegtaa sababta aad u weydinesid magangalyo. Haddii aad fahmi weysid su'aalaha oo aysan waadix aheyn, weydii qofka wareysiga kugula jira in uu sharaxo.

Waxaa muhiim ah maclumaadkada aad adigga sheegtay in ay run yihiin, waa in aad sharaxaad ka sii saa sida ugu muhiimsan ee macquulka ah sababaha aad ugu soo carartay, maxey tahay sababta ugu soo tagtay dalkaada iyo maxey tahay sababta aad Waddanka Kuruwatiya ugu codsaneysid magangalyo. Haddalka beenta ah ama maclumaad been ah haddaad sheegtid waxey sababtaa in go'aan diidmo lagu siiyo oo ku saabsan dalabkaada badbaadda caalamiga ah.

Sheeg haddii aad waddatid wax dukumiinti ah. Haddii aadan waddanin wax dukumiinti sababta oo ah waxaa ugu soo tagtay waddankaada, isku day in aad ku heshid waqtiga ugu dhow ee suurto galka ah maxaa dhacay, warqadahaas waa muhiim si go'aan looga gaaro dalabkaada badbaadda caalamiga ah.

Haddii, ay jiraan cabsi in lagu cadaabo ama ay jiraan sababo kale oo aad u malaynesid in aadan ku noqon karin waddankaada, sheeg arintaas qaasatan markii la diiwaan gelinaayo dalabka badbaadda caalamiga ah. Iyada oo la tex gelinayo sababaha aad sheegatay, waxaa lagu siinaa ogolaansho ah ilaalo farciyeed.

4 Waa maxay sababta nidaamka Dublin loo isticmalaayo? Si loo dhiso wadanka masuulka ka ah go'aan codsigaaga!

Mararka qaarkood, Kuruwatiya mas'uul kama noqon doonto in fiiriso in aad u baahan tahay magangalyo, laakiin waddamada kale ee Midowga Yurub kujira, sida Eyslan (Iceland), Leenjistaan, (Lichtenstein), Noorweey, (Norway) ama Isweserland (Switzerland):

- Haddii aad tahay ilmo da'yar, oo aad ku leedahay qoys ku heysta sharci ogolaansho deganaansho waddamada aan kor ku soo sheegnay;
- Haddii aad ku leedahay xubno kamid ah qoyska (tusaale ahaan: ninkaada, naagtada, ilmo) oo horey u qaatay ama codsaday magangalyo mid ka mid ah waddamada kor ku xusan;
- Haddii aad ku leedahay sharci ogolaansho shaqada ama viiso dal ku gal ay soo saareen waddamada kor ku xusan;
- Haddii faraha horey lagaaga soo qaaday adiga oo ahaa magangalyo doon ama soo galooti aan caadi aheyn ku ahaa waddammada aan kor ku xusan;
- Haddii ay jiraan caddeymo ah in aad dagneed ama aad u socdaashay gobol kale, xitaa haddii aan farah halkaas lagaaga qaadin.

Haddii howshaada lagu dhiso in ay Kuruwatiya masuul ka aheyn codsigaada, waxaa laga garaa go'aan ah in Kururwatiya aysan aheyn waddanka masuulka ka ah ama waxaa laguu wareejin doonaa mid ka mid ah waddamada aan kor ku soo xusnay.

Haddii aad ku leedahay xubin ka tirsan qoyskaada oo ku nool waddamada kale xubin ka ah Midowga Yurub (EU), waxaa codsan kartaa mideynta qoyska!

Mararka qaarkood waxaad tegi kartaa kahor inta aan lagu wargelinin waddanka masuulka ka ah in ay baarto codsigaada, sidaas darteeda dul qaado!

5 Maxaa dhacaya markii aan soo gudbin codsiga badbaadda caalamiga ah? Wareysi dhagaysi ha waxaa lagu qaban doonaa iyo go'aan ayaa la dhiibi doonaa!

Haddii howshaada lagu dhiso in ay Kuruwatiya masuul ka tahay codsigaada, Mararka qaarkood markii aad dhiibatid dalabka magangalyo caalamiga h, waxaa lagugu wacayaa wareysi. Is dhageysiga waa wareysi la yeeshaneysid masuul, taas oo ah muhiin u ah howsha si go'aan looga gaaro. Haddii loo baahdo in wareysi kale oo dheeraad lagula yeeshto, waa lagu soo ogeysiin doonaa tariiqda iyo meesha lagu qaban doono iyo saacada wareysiga kale dhici doono, waxaa muhiim ah in aad xaadirtid wareysiga shaqsi ahaan, si kasta ha ahaato haddii aadan heysan qareenka qaanuunka ama heysatid waa in aad adigga isdiyaarisaa, waxaa suurto gal ah in waqtiga wareysiga uu dheeraado.

Lama ogaan karo mudadda ay qaadan doonto waqtiga uu soo bixi doono go'aan. Tan waxey ku xiran tahay arintaada qaaska ah. Waa laguu sheegi doonaa waqtiga aad ka filan karto in go'aan la soo saaro. Waqtiga ugu badnaan loogu talagalay go'aan in la gaarsiiyo waa 21 bilood.

Go'aanka rasmiga ah waxaa laga yaabaa in uu yahay ogolaansho (marka lagu siiyo magangalyo ama lagu siiyo ilaalo farciyeed) ama ah mid diidmo (magangalyo laguma siinin).

6 Maxaan iska ilaaliya marka lagu gudo jiro wareysiga? Waa in aad siisaa dhamaan wixii warbixin oo muhiim ah!

Marka ugu horeysa wareysiga bilowgiisa, wakiilka wuxuu kuu sharaxaya habka u dhacayo howsha wareysiga. Waxaa kale meesha joogi doono turjumaanka luuqadaada ama luuqada kale aad adiga ku hadashid ama aad fahantid marka lagu gudo jiro wareysiga. Waxaa kale aad weydiisan kartaa wakiilka wareysiga kula yeeshanayo iyo/ama turjumaanka uu aad iske lab ama dhidig tihiin ama isku jinsi, waa laguu ogolaan doonaa hadey suurto gal tahay sidaas. Haddii aad dooneyso in wakiilka wareysiga kuula yeeshanayo iyo/ama turjumaanka uu noqdo mid aad isku lab ama dhidig tihiin ama isku jinsi, waa in aad ogeysiisaa wakiilka ka hor inta aan codsigaada magangalyada caalamiga la diiwaan galinin, si lagugu keeno qof aad isku jinsi tihiin uu meesha u joogo markii lagu jiro howsha wareysiga codsiga magangalyada caalamiga.

Masuulka qaabilsan arintaada wuxuu baari doonaa waxa ka jira waddankaada, sidoo kale wuxuu ku weydiin doonaa faahfaahin su'aalo ku saabsan maclumaadkii aad siisay ama sheegaty, markii aad ku gudo jirtay wareysigii kowaad, ama codsigaada magangalyada caalamiga. Ku sheeg wax walbo oo muhiim u ah arintaada, sheeg sababta aad ugu soo tagtay waddankaada sida aad ugu soo tagtay iyo yaa waaye kuwa ama kooxda ku soo cadaabtay, cabsi la'aan u hadal maxaa yeelay dhamaan waxaad sheegtid oo dhan iyo maclumaadkada shaqsiyeed waa arin sir ah oo aan loo gudbin doonin dadd kale ama waddan kale maclumaadkada shaqsiyeed looma gudbin doono masuuliyiin kale oo aan shaqo ku laheyn howshaada. Haddii aadan xasuusanin kuwa ka mid ah maclumaadka, tariiqda ama goobta, waxaba haka wal walin, laakin ha sheegin maclumaada aan jirn oo been ah.

Haddii aadan waddanin dukumiinti cadey qofka aad tahay adigga, ama haddii aad isticmaashay dukumiinti qof kale leeyahay markii aad soo safreysay, u sheeg masuulka sababta aad u isticmaashay dukumiintiga bugta ah. Masuulka qaabilsan arintaan wuu baarayaa dhamaan dukumiintiyada aad waddatid.

Haddii aad fahmi weysid ama aad u baahan tahay fasiraad dheeraad ah, sheeg saas.

Falanqeyn dheeraad ah sii, runta sheeg.

Horey u soo qaaddo dhamaan warqadaha iyo sawiro kaa saacidi doono in ay cadeeyaan in lagugu cadaabay waddankaada (warqad bayaan oo booliska ka socota, xukun maxkamadeed, warqad hanjabaad ah, cadeeymo in lagu xiray, daliil cafimaadka, dhanbaalka wargeeyska, iwm. Heyso koobiyaha).

Ha diiddin wareysiga, kuuma fiicana adigga kumana saacidaayo. Haddii aad jiran tahay ama laguu diido in aad ka qeyb qaadatid wareysiga oo ay jirto sabab rasmi ah, waa in aad sida ugu dhaqsaha badan ku soo ogeysiisaa masuuliyiinta Kaamka. Haddii aadan ka cudur daaran maqanaan shahaaga 2 maalin gudaheeda waqtiga balanta wareysiga uu dhici lahaa, howsha waa la joojin doonaa, taas oo micnaheeda ah, waxaa kaa dhumaayo dhamaan wixii xaq badbaado caalami ah ee aad heysan jirtay.

Haddii marka lagu gudo jiro wareysiga, aad dareentid in aad daalan tahay, markasta waad weydin kartaa in lagu siiyo waqti yar oo nasasho ah.

Waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo markii lagu gudo jiro wareysiga waxaa laga yabaa in ay jowaabta ay tahay mid xishood leh. U sheeg masuulka qaabilsan howsha sidaan. Laakin ogow, maskaxdane ku hey kajowaabida su'aalahan oo kale waxaa laga yaabaa in ay guul kuu soo hoydo marka ay go'aan ka garayaan arintaada ku saabsab codsiga magangalyada caalamiga ah iyo in lagu siiyo ogolaansho qoxootinimo ama in laguu tixigeliyo in lagu siiyo ilaalo farciyeed. Wax walbo kugu soo dheceen ma ahan in aad ka xishootid, cid ku eedeyso ma jirayaan.

Markii lagaaro dhamaadka wareysiga, masuulka qaabilsan arintaada wuxuu kuu aqrinaa dhamaaan waxaad sheegtay isaga oo kaalmeysanayo turjumaanka. Haddii aad ogaatid in aan loo qorin hadalka aad sheegtay sida aad rabtay, ama laga booday hadal markii la qoraayay, u sheeg masuuulka qaabilsan artintaada isla markiiba, isaga ama iyada wey sixi doonaan inta aad saxiixin qoraalka qoran. Markii aad saxiixdid qoraalka, waxaa loo qaadana waxa walba wixii ku qoran qoraalka in ay tahay waxa aad ku sheegtay markii lagu gudo jiray wareysiga.

Haddii aad u maleysay in turjumaanka uu turjumin waxa aad sheegtay si sax ah, ama aadan ku qanacsaneyn habka uu masuulka howsha u waddo, ficil samee kahadal kadibna weydiiso turjumaan kale ama masuul kale. Laakin haku xad gudbin fursadaan, maxaa yeelay meesha uu ka dhacaayo wareysiga waxaa goob jog ah dadd kale oo ogaan doono sida wax u dhaceen.

Haddii uu san jirin wareysi, howsha waa mid boob siisa ah. Waxaa muhiim ah in aad sheegtid runta, si foojig naan leh oo macquul ah ku cadey iyo si wax la harid la'aan hadalkaada ku sheeg, dhiib faah faahin dheeraad leh sababta aad uga soo tagtay dalkaada asliga ah.